

Maaliyadda Kaalmada Kirada Magaalada Boston
(City of Boston Rental Relief Fund)
Warqadda Qabashada Maalgelinta

Office of Housing Stability
43 Hawkins Boston, MA 02114

Taariikhda Dhicidda _____

Bilaha abaal marrinta RRF _____

Magaca Milkiilaha Hantida _____
Magaca Dagganaha (Dagganeyaasha): _____
Cinwaanka Kirada _____

Wakaaladda Maamulka Maaliyadda Kaalmada Kirada (Rental Relief Fund Administering Agency) waxay ku talojirtaa in ay kaalmada maaliyadda soo socoto siiso Ka-Qeybgalaha kor lagu magacaabay (waa in la geliyo "N/A" haddii Aan Lagu Dabaqi Karin):

Xisaabta Kirada Bil Kasta \$ _____

Lacagaha Laguugu Leeyahay \$ _____

Mushaarka mustaqbalka \$ _____

Kharashka guuritaanka \$ _____

Iskudarka Xisaabta Kaalmada Kirada \$ _____ (ilaa toban iyo sideed bil oo ah kaalmada kirada xisaabta aruurtay, mushaarka, iyo/ama kharashka guurista in aysan ka badanin \$15,000)

Aqoonsiga Milkiilaha

- Aniga waxaan xaqiijinaa in aan ahay milkiilaha hantida (ama wakiilka mattala milkiilaha hantida) kor lagu magacaabay (Cinwaanka Ka-Qeybgalaha).
- Aniga waxaan xaqiijinaa in marka aan aqbaloo lacag bixinta kirada sida ku qoran warqadaan, in aan waafaqsanahay:
 - In dib loo soo celiyo dagganaashada Ka-Qeybgalaha ama waxaan aqbalay in ka-qeybgalaha u yahay daggane.
 - In aan horay loo sii wadin ka-saaridda taasoo ugu wacan bixin la'aanta kirada muddo 60 maalin taasoo ka badan muddada quseeysa kaalmadaan kirada degdegga.
 - In la joojiyo kiiska ka-saaridda haddii kaalmadaan wax ka qabato lacagaha kirada aruurtay.
 - In aan ogeysiyo Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) haddii ay wax iska baddalaan dagganaashada Ka-Qeybgalaha
 - In aan ugu yaraan hal kulan dhexdhexaadin la galo dhexdhexaadiyeyasha Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability) haddii ay soo baxaan arrimo la xariira dagganaashada Ka-Qeybgalaha.
- Haddii Wakaaladda Maamulka RRF (RRF Administering Agency) ay kharashka kaalmada kirada ka bixiso Ka-Qeybgalaha, Aniga waxaan waafaqsanahay in aan u hoggaansamo dhamaan waajibka saaran milkiilaha sida waafaqsan [M.G.L., c.186 s. 15B](#).
- Haddii la soo afjaro dagganaashada Ka-Qeybgaleyaasha ka hor inta aan la gaarin muddada la bixiyo kharashka kaalmada kirada bisha, Aniga waxaan waafaqsanaha in aan Wakaaladda RRF u soo celiyo baaqiga aan la isticmaalin maaliyadda la soo sheegay.
- Cutubka 151B Sharciyada Guud Massachusetts (Massachusetts General Laws) wuxuu mamnuucay takoorka uu milkiilaha hantida u geysto daggane kasta oo qaata kabidda guriyeynta federaalka, gobolka, ama deegaanka, kana mid ah kaalmada kirada ama dheeraadka kirada, maxaa yeelay qofka wuxuu yahay qaataha noocaas. Diidmada milkiilaha in uu qaato kaalmada kirada degdegga, ee bixisa xisaabta idil ee laga qabo milkiilaha hantida, taasi waxay xaaladaha qaar la mid tahay jebinta Cutubka 151B. Milkiileyaasha hantida waa in ay la tashtaan qareenadooda sharciga si ay u helaan waano ka hor inta aysan diidin kaalmada kirada ee bixisa dhamaan xisaabta kirada aruurtay.
- Ma jiro wax ku jiro warqadaan oo ka reebaayo milkiilaha/wakiilka in uu isticmaalo dhamaan waxyaabaha hoos yimaado sharciga, kana mid ah hay'adda dacwadaha ka-saaridda Ka-Qeybgalaha, haddii Ka-Qeybgalaha ku fashilo in uu bixiyo kirada mustaqbalka ee laga rabo taariikhda warqadaan kaddib.
- Aniga waan fahamsanahay in bixinta macluumaad been ah ama sheegidda warar been ah, in taasi aasaas u noqon karto in la soo diido arjigeysiga. Waxaan kaloo fahamsanahay in talaabada noocaas dhallin karto ciqaabta dambiyada.

Saxiixa Milkiilaha Hantida/Wakiilka

Saxiixa Shaqaalaha Wakaaladda Maamulka RRF

Magaca Milkiilaha Hantida/Wakiilka

Magaca iyo Mansabka Shaqaalaha Wakaaladda Maamulka RRF
(RRF Administering Agency Staff Name & Title)

Milkiilaha Hantida/Telefoonka Wakiilka

Taariikhda la Saxiixay Warqadda:

Macluumaadka lagala xariiro Xafiiska Sugidda Guriyeynta (Office of Housing Stability)
(Email) rrf@boston.gov | (Telefoonka) 617-635-4200

Warqadda Qabashada Maaliyadda Kaalmada Kirada
(Rental Relief Fund Acceptance Letter)